# Waxbarashada Dhismaha.

Madoonaysaa in aad ku shaqeysid gacmahaaga?
Madoonaysaa in aad ka shaqeysid shaqo marwalba gacmaha lagaga shaqeeyo?
Madoonaysaa in aad lashaqaysid dad ku takhasuusay shaqaadaada oo kale?
Madoonaysaa in aad markaad qalinjebisis dugsiga sare in aad shaqo toos ah aad u raad satid. ilsamarkaana aad heysatid fursad haddii aad doonaysid in aad wax barashadaada aad sii wadatid?
Madoonaysaa in aad shaqo ama waxbarasho u doonatid wadamo kale oo shi-sheeye?
Sidaas daraadeed waxbarashadan dhismuhu waa mid adiga gaar ahaan kugu haboon

Waxbarashadan dhismaha waxa aad barandoontaa marka hore asaaska xirfado farabadan, kuwaas oo laxidhiidha shaqooyinka lagu sameeyo gacmaha.Islamarkaana waxaad barandoontaa xirfado is bedelo horumareed sameysa. Waxaad kalood barandoontaa qiimaha iyo muhiimadu ay noogu fadhido dabbecadu, waxayna ku jirta waxbarashadan

Dhismaha ama shaqooyinka dhismuhu waa mid marwalba hoostimaada sharciyada u degsen dhismaha. Waxaad dooran karaysaa in aad ku takhasuustid maado, islamarkaana aad adigu noqotid mid ku wanaagsanaada tacliinta uu doortay.waxa kaloo intaas dheer in aad barandoontid habka dadka kale ee kula shaqeeya aad ula shaqeen laheed, isla markaana sidii aad u fahmilaheed habaka kaladuwan ee wax loodhiso.

Dhismuhu siduusuba waa mid caalami ah. Waxaa kuu kordhi doona in aad baratid luqado kale,iyo in aad wax badan aad fiiro gaarah aad u lahaatid, iyo in xiiso dhaqamada kale uu kugu dhash. Waxa aad heli doontaa fursad aad u balaadhan oo ah in aad shaqeysid ama aad waxbarasho u tagtid dalalkale oo shi-sheeye, kadib marka aad dhameysid waxbarashada dhismaha.

## In aad shaqeysid ama waxbarashadaada sii wadatid.

Haddii aad dooratid waxbarashada dhismaha,waxaad markaa aad sameynkaraysaa in aad shaqo aad doonatid kadib marka aad waxbarashadaada dugsiga sare ay kuu dhamaato. shaqooyinka aad doonankareysid waxa ay ku xidhantahay hadba waxbarashada takhasuska ee aad dooratay. Waxaa inta badandhacda in aad tababar xirfadeed aad sameyndoontid, kaas oo noqonkara mudo sanad ama in kabadan. Waxa lagusiin doonaa ama aad qaadan doontaa lacagta tababarka laqaato, waxaana lasocondoontaa ama ku hogaamindoona qof ka shaqeeya qeybtaas aad adigu baranaysid. Waxaanaad ka faaideysandoontaa waxna aad ka baran doontaa dadkaa aad la shaqeendoontid.

Dadkaas oo leh khibradaad ubadan, Islamarkaana kana soo sheqeenjireen mudo ad u farabadan qeeybtaas aad wax barashada aad ugu jirtid.

Haddii aad doonaysid waad siiwadan kareysaa waxbarashadaada kadib marka aad dhameysatid waxbarashadaada dugsiga sare ilaa iyo heer jaamacadeed.

**Shaqooyinka aad heli kareysid**

Marka aad dhameysatid waxbarashada dhismaha, waxa aad ka shaqeen karaysaa , sidaShaqooyinka buuraha,dariiqdhisida,buundo dhisid,shubka ama shubdhisida,dhismayaasha guryaha iyo daaraha, farsamoyaaqaan dhismeed, farsamo yaqaanka muraayadaha, barxad dhagaxdhige,ranjiile,qorye sameeye,saqaf hagaajiye, qalabka hawada qaada,iyo qofka iibiya qalabka dhismaha.

**Waxbarashadani waxa ay ka koobantahay**

Waxabarashadan dhismaho wax ay ka koobantahay casharo, Casharada qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo u gaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada dhismaha oo kaliya. Waxaa intaas sooraaca in ay jiraan casharo kale oo aad adigu gooni aad u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay 4 takhasusood oo kaladuwan.taas oo macnaheedu ay tahay ardayda dhamaan ku sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ay doonayaan in ay ku takhasusaan.waxaa laga yaabaa in meelo kale aad ka heshi waxbarashooyin kale, waxaa suurtogalha meesha aad degentahay in aad ka helikartid waxbarasho badan oo takhasus ah, kuwaas oo adiga kugu haboon.Waxaad weydiinkareysaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada( studie och yrkesvägledare)

**Takhasuska guud waxa uu ka mid ah.**

- Dhismaha- waxa uu khuseeyaa ardeyda rabta in ay bartaan sida, dhismaha jidadka, jidadka tareemadu maraan,buundooyinka, bulaacadaha biyaha ay maraan, meelaha lagunasto ama jardiinooyinka.
- Guryodhisid- waxa uu gaar uu uyahay ardeyda rabta in ay ku takhasusaan, sida looxyada ama alwaaxyada,shubka,dhismayaash shubka ah ee diyarka ah,amse doonaya in ay doortaan ta khasuso kale.
- Ranjiyeenta- waxa uu gaar uu yahay ardeyda doonayasa inay ku shaqeeystaan sida, ranjiyeenta dhismayaasha daaraha iyo guryaha, ku waas oo ah dhismayaasha gudaha iyo debedaba. Ama haddii kale oo aad adigu gaar ahaan aad xiiseynaysid in aad ku takhasuusto renjiyeenta.
- Birdhalaaliye – waxa uu khuseeya gar ahaan adiga haddii aad doonaysid in aad baratid asaaska xaga bir sameenta, kadibna jecel in uu uga gudbo xaga dhismaha qeeybta biraha sameenta, ama qeybaha kaladuwan ee dhismo hawo qaadayaasha.

**Xidhiika suuqa shaqada**

Marka aad ku jirtid waxbarashada dhismaha waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada,Waxaad kaloo aad heysataa ugu yaraan ilaa iyo15 isbuuc oo dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diri doona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskuulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhaw meesha aad degen tahay.waxa aad xidhiin aad la yeelandoonta shirkadaha iyo shirkadaha dhismaha ee waaweyn ee ku kala yaala wadana kale.Waana habka ugu wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiina aad ku yeelan kartid.xidhiidh kaas oo aad markale aad kaga faa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.haddii aad doonaysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen Swiidhen, way surtogal noqon kartaa.

**Mustaqbalka iyo shaqooyinka**

Sanadihii u danbeyey dad aad u badan ayaa looga baahday qeybaha kala duwan ee dhismayaasha ah. Waxaa kaloo loo baahnaan doonaa sidoo kale mustaqbalkana dad xirfad iyo aqoon fiican u leh dhismayaasha.iswiidhen waxaa ka socda dhismayaal aad u farabadan,inkastoo dhismayaashaasi inta badan ey ka socdaan magaalooyinka waaweyn. Wax marka ah in aad kutalagashid una diyaar garowdid in aad meelo kala fog-fog u safridoontid si aad uga soo shaqeysid. Shaqooyinka dhismahu waa mid inta badan ah xasaasi, markastana is bedelikarta.sidaas daraadeed way adagtahay in la saadaaliyo in aad shaqo sifudud aad ku heli doontid iyo inkale.